



PPS Waxay Sii Wadi Rabitaanka Afsaabka ee Dibadda Wakhtigan la Joogo

Qoysaska PPS ee Qaaliga ah,

Toddobaadkii hore, Badhasaab Kate Brown iyo saraakiisha gobolku waxay ku dhawaaqeen inay qaadayaan shuruudda afsaabka ee dibadda, iyadoo degmo dugsiyeedyadana ikhtiyaar loo siiyey inay sidaas oo kale yeelaan. Hase yeeshe, wakhtigan la joogo, Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay sii wadi inay shardi ka dhigaan afsaabka meelaha oo dhan, oo ay ku jiraan dibaduhu, waxaananu rabnaa inaanu kuu sheego sida go'aankaasi aanu ku gaarnay.

Kadib markii Maamulka Caafimaadka Oregon iyo Waaxda Waxbarashada Oregon ay siiyeen dugsiyada ikhtiyaarka ah inay qaadaan shardiga afsaabka ee dibadda, Guddidayada Talobixinta Caafimaadku waxay la kulmeen khubaro caafimaad oo heer qaran ah iyo maamulka caafimaadka dadwaynaha ee deegaankayaga. Go'aankayaga: sii wadidda shardiga afsaabka ee dugsiyada oo dhan wuxuu na siiyey fursadda ugu wanaagsan ee aanu ku yaraynayno gudbinta COVID-19 iyadoo aanu kordhinayo wakhtiga fasalka ardayda oo dhan joogayaan.

Anagoo adeegsanayna isku darka dadaalada fududaynta, afsaabka xirashadiisa iyo tallaalada, waxaanu awood u yeelanay inaanu meel hoose ku hayno gudbinta cudurka gudaha PPS. Dhinaca kale, tani waxay noo oggolaatay inaanu qaadno tallaabooyin kale si aanu u difaacno ardayda iyo wakhtiga fasalka, sida [barnaamijka Baaritaanka sii Joogista](#) kaasi oo aanu ka shaqaynayno inaanu hirgalino bisha Janaayo. Waxaanu rumaysannahay in qaadista shardiga afsaabka dibadda, wakhtigan, ay khatartiisu ka badan tahay faa'idadiisa.

Tusaale ahaan, sida tilmaamaha gobolku dhigayaan, marka ardaydu ay kaqaybqaadanayaan nasashada dibadda iyagoo bilaa afsaab ah, haddii mid ka mid ah ardaydan laga helay COVID-19, dhammaan ardayda la sheegay inay qofkaasi la jooheen garoonka ciyaarta waxa suurtoagal ah in la karantiilo oo ay fasalka ka maqnaadaan, iyo sidoo kale ardayda iyo shaqaalaha dugsiga ee kale ee u baylahay ardaygaasi. Wakhti ay daqiiqad kasta oo fasalka lagu qaato ay qiime wayn leedahay kadib markii sanad waxbarashada fogaan lagu qaadanayey, waxaanu rumaysannahay in xirashada afsaabku aanu kharash badan innagu ahayn si aynu u ilaalino ku-laabashada waxbarashada fool-ka-foolka ah.

Haddii aynu iska dayno shardiga afsaabka ee dibadda, sidoo kale awood u yeelan mayno, sida ay dhigayaan tilmaamahan wakhtigani, inaynu kaqaybqaadano Baaritaanka sii Joogitaanka, oo ah barnaamij ardayda aan tallaalayn ee u baylaha COVID-19 iyagoo dugsiga jooga loogu oggolaanayo inay sii joogaan dugsiga iyagoo kaqaybqaadanaya baaritaan dugsiga lagu qabanayo.

Go'aankani sinaba ku ahaan maayo mid abadi ah/joogto ah, waxaananu sii wadi inaanu la socono xogta, la tashano khubarada oo aanu ka war hayno haddii nooca Omicron ee COVID-19 ee cusub uu yahay arrin taagan halkan Oregon.

Waad ku mahadsan tahay dulqaalkaaga joogtada iyo garawshiyaha.